Tallaalada COVID-19 ee loogu talagalay Dhalinyarada Fahmidda Oggolaanshaha

Vaccinate WA
CovidVaccineWA.org

Talaallada COVID-19 ayaa hadda diyaar u ah dhalinyarada da'doodu udhaxeyso sano. Tallaal bixiyaal badan ayaa u baahan oggolaanshaha waalidka ama qof mas'uul ka ah dhallinyarada da'doodu kayar tahay 18 sano si ay u qaataan tallaalka. Hase yeeshee, haddii aad kayar tahay 18 sano oo aadna ka madax bannaan tahay waalidiintaada, waxaa laga yaabaa inaad oggolaansho isasiiso adiga kiisaska qaar ama oggolaansho aad kahesho iskuulkaaga haddii aad wajahayso guri la'aan oo aadna la joogin waalid ama qof mas'uul kaa ah. Dukumiintigaan waxa uu ku tusinayaa noocyada kala duwan ee oggolaanshaha uu oggol yahay sharciga gobolka, sida lagu helo tallaal bixiye kuu adeegi kara, iyo sida loogu diyaar garoobo ballantaada tallaalka.

Dadka waaweyn ee adiga oggolaansho kusiin kara:

- Waalidka
- Qof mas'uul kaa ah ama ilaaliyaha sharciga ah
- Waalidka kusoo koriyey ama qof kale oo ay maxkamad u oggolaatay inuu oggolaansho ka bixiyo daryeelka caafimaadka ee ilmo ku jira goob ka baxsan guriga (Cutubka 13.32A ama 13.34 Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Washington ee Dib-loo-eegay))
- Qof la siiyey oggolaansho saxiixan si uu kuugu sameeyo go'aannada daryeelka caafimaadka
- Qof qaraabada ah oo mas'uul ka ah daryeelka caafimaadkaaga
- Kalkaalisada iskuulka, la-taliye, ama isku xiraha dadka guri la'aanta ah (haddii lagugu qeexo inaad tahay guri la'aan sida hoos timaada sharciga federaalka McKinney-Vento Homeless Education Act)*

Waxaad adi oggolaansho isasiin kartaa haddii:

- **Aad si sharci ah xor utahay.** Aad jirto 16 sano ama kasii waynn tahay oo aadna xareysatay dacwad oona laguu oggolaaday inaad xor katahay waalidiintaada.
- **Aad guursatay qof yar oo la xorreeyey ama qof weyn.**
- **Bixiyaha tallaalka ayaa go'aamiya inaad tahay qof yar oo qaangaar ah** sida kucad Mature Minor Doctrine (Mabda'a Dadka Yaryar ee Qaangaarka Ah).**

*Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan oggolaanshaha ayadoo la isticmaalaayo sharciga McKinney-Vento:

Sida ku xusan sharciga gobolka, kalkaalisooyinka iskuulka, lataliyaasha iskuulka, iyo isku xirayaasha ardayda guri la'aanta ah ayaa loo oggol yahay inay siiyaan oggolaanshaha tallaalka ee dhallinyarada ama dadka yaryar ee hoy la'aantu hayso (sida lagu qeexay sharciga hoos imaanaaya federaalka federal McKinney-Vento homeless education act - Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi) qofkaas oo aan si muuqata u hoos imaaneynin mas'uuliyadda waalidka ama qof mas'uul ka ah.

Lifaaqa ilaha: National Center for Homeless Education, *Kaalmeynaya Waxbarashada Ardayda Aan Qofna Lasocon ee Wajahaya Hoy La'aanta,* https://nche.ed.gov/wp-content/uploads/2018/10/youth.pdf - Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi

**Xog dheeraad ah oo kusaabsan Mature Minor Doctrine:

Tallaal bixiyaasha qaarkood waxa ay u oggol yihiin dadka aan qaangaarin inay siiyaan oggolaansho ansax ah sida hoos imaaneyso sharciga “Mature Minor Doctrine” haddii ay fahmi karaan ama qadarin karaan cawaaqibka ka imaanaayo habraaca daaweynta.

Marki ay timaado go'aaminta in bukaanku yahay qof qaangaar ah oo yar, tallaal bixiyaashu waxa ay qiimeyn doonaan da'da qofka yari, garaadka, qaangaarnimada, tababarka, waaya aragnimada, madax bannaanida dhaqaale ama intaa la'aanteed, anshaxa guud ee ka qof weyn ahaan iyo ka madax bannaanida maamulidda waalidka.

Tallaal bixiyaashu waxa ay ku aqbalaan oggolaanshaha dhawr siyaabood oo kala duwan.

- Oggolaanshaha afka ah waa la oggol yahay (taleefan lagu sheegay ama si toos ah)
- Oggolaansho qoran (foom)
- Qaarkood waxa ay ubaahan yihiin labadaba oggolaansho qoraal ah iyo afkaba.
- Oggolaansho toos ah oo ka imaanaya qof weyn ee oggolaanshaha kusiinaya adiga.

Tilmaamaha loo qaato tallaalka

☐ **Isticmaal kala shaandheeyaha/filtarka xulashooyinka ee ku yaallo Vaccine Locator (Meeleeyaha Tallaalka) (**https://vaccinelocator.doh.wa.gov/?language=so**) ama wac bixiyaha tallaalka si aad u ogaato nooca oggolaansha ee uu aqbalo tallaal bixiyaha.** Xulashooyinka kala Shaandheynta/Filtarka Ufiican Dhallinyarada oo ku yaallo Vaccine Locator ayaa kaa caawin doona inaad hesho tallaal bixiye kaala shaqeyn doona xaaladaada. Tusaale ahaan, haddii aad haysato qof weyn oo oggolaansho kusiin kara laakiin aan kuusoo raaci karin ballantaada tallaalka, raadso tallaal bixiye kaa aqbalayo oggolaansho qoraal ah.

☐ **Raadi goobaha tallaalka ee aqbalaya iska imaatinka ballanta lahayn ama wac si aad uqabsato ballan,** haddii aadaan haysan waalid/mas'uul kuugu buuxin kara foomka oonleenka ahaan. Tallaal bixiyaal badan waxa ay dalbadaan in waalid ama qof mas'uul kaa ah uu buuxiyo foomka oggolaansha si laguugu qabto ballanta onlayn ahaan.

☐ **Ka hubi iskuulkaaga.** Haddii ay kusoo food saartay guri aan la isku halleyn karin/guri la'aan, sharciga McKinney-Vento ayaa laga yaabaa in lagugu dabaqo. (Ka eeg qeybta hore wixii xog dheeraad ah.) Waxaad awoodi doontaa inaad kala shaqeyso kalkaalisada dugsiga, lataliyaha dugsiga, ama isku xiraha ardayda hoy la'aanta ah si ay kuusiiyaan oggolaansho.

☐ **Isku diyaari nooca oggolaanshaha ee aad rabto in lagu siiyo:**

- ☐ Haddii qof weyn loo baahan yahay inuu joogo ballantaada tallaalka, kala shaqee iyaga.
- ☐ Haddii tallaal bixiyuhu uu aqbalayo oggolaansho qoraal ah, iska eeg haddii qofka kusiinaya oggolaanshaha uu kuudaabici karo oona kuu saxiixi karo foomka.
- ☐ Haddii aad tahay qof yar oo la xorreeyey ama qof yar oo guursaday qof yar oo la xorreeyey ama qof weyn, waxaa laga yaabaa inaad ubaahato inaad keento dukumiintiyada.
- ☐ Haddii aad ku heleyso oggolaanshaha adiga oo isticmaalaya sharciga McKinney-Vento, oo aad ka walaacsan tahay in tallaal bixiyuhu uu kuweydiin doono su'aalo, waxaad keeni kartaa nuqulka/koobiga sharciga Oggolaanshaha Xog-ogaalka: RCW 7.70.065 – Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi waxaadna ka muujisaa qeybta gaarka u ah iskuulada. (Lifaaqa sharciga: https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=7.70.065 – Webseed kaliya ah Af-Ingiriisi). Ogsoonoow: Tani MA AHAN shardi.
- ☐ Haddii aad dooneyso inaad oggolaansho isasiiso adiga oo u maraaya Mature Minor Doctrine, waxaa lagaaga baahan karaa inaad keento dukumiintiyada iyo xogta muujineysa inaad ka madax bannaan tahay waalidiintaada. Tani uma wada baahna dhammaan tallaal bixiyaasha laakiin waa ay ku caawin kartaa. Tallaal bixiyaasha qaarkood maku sameeyaan goobta go'aaminta dadka yaryar ee qaangaarka ah laakiin waxa ay ka aqbalaan dadka yaryar ee qaangaarka ah ee kasocdo tallaal bixiyaashi hore.

Washington State Department of Health

DOH 825-018 December 2021 Somali
Si aad dukumiintigaan oo qaab kale ah u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov